

# Waa maxay Deeqda waxbarashada Ka qeybgalka Kulliyada?

**Ardyada Dugsiga Dhexe:** Ma xiiseyneesa daryeelka caafimaadka? Dhismaha? Naqshada geemka fiidiyaha? Maamulida ganacsi? Wax walba oo hadafyada shaqadaada, Deeqda waxbarashada Ka qeybgalka Kulliyada oo kugu caawineyso ka qeybgalka iyo bixinta dugsiga adiga kuu wanaagsan! Kulliyad Ka qeybgalka waa balanqaad hore ee gargaarka dhaqaamalaha gobolka ee ardayda u qalma oo iska diiwaangeliyo dugsiga dhexe oo buuxiyaa balanqaadka Ka qeybgalka Kulliyada. Deeqda waxbarashada Ka qeybgalka Kulliyada waxay dabooshaa waxbarashada isku celceliska, qidmooyinka, iyo gunnada buugin gareninta oo in ka badan 60 kulliyado, jaamacada, iyo dugsiyada farsamada ee Washington. Ma ka Qeybgaleysaa Kulliyada?

## Miyaan u qalmaa?

Codso haddii aad ku jirtid fasalka 7aad ama 8aad oo buuxisid mid ka mid ah sharuudaha xiggo:

- ▶ Qoyskaaga wuxuu buuxiyaa sharuudaha daqliga ee jadwalka hoose.
- ▶ Aad tahay koriyaha daryeelaha ama ku tiirsantahay gobolka.
- ▶ Qoyskaaga helo aasaaska cuntada ama faa'idooyinka TANF.

## Jadwalka Daqliga 2020-21

Cabirkha Qoyska	Daqliga Sannadlaha*	Daqliga Bil-lahae	Daqliga Isbuuclaha
2	\$31,894	\$2,658	\$614
3	\$40,182	\$3,349	\$773
4	\$48,470	\$4,040	\$933
5	\$56,758	\$4,730	\$1,092
6	\$65,046	\$5,421	\$1,251
Qoys walboodheeraad ah lambar	\$8,288	\$691	\$160

\*Daqliga qoyska waa inuu ka yaraadaa ama u dhigmaa cadadkaan.

## Sidee ayaan u codsadaa?

Waad ka codsan kartaa onleenka [collegebound.wa.gov](http://collegebound.wa.gov). La hubi la taliyaha dugsigaaga; si ay kuugu bilaabaan arji adiga oo dugsiga ah.

## Waa maxay balanqaadka?

Ardyada Ka qeybgaleysa Dugsiga waxay balan qaadaan in ay:

- ▶ Uga qalinjabiyaan dugsiga sare ee Gobolka Washington ama dugsiga guriga isku darada 2.0 GPA ama ka sareeyo.
- ▶ Codso kulliyada.
- ▶ Gubi FAFSA (Arjiga Bilaashka ah ee Gargaarka Ardayga Faderaalka) ama WASFA (Arjiga Washington ee Gargaarka Dhaqaalaha Gobolka) sida ugu dhaqsiha badan kadib Oktoobar 1 sida suurtogalka ah ee sannadkaaga koowaad ee dugsiga sare.
- ▶ Ha yeelan xukunada dambiyada.

## Miyay jiraan dhammaadka waqtiga?

Haa! Waa inaad codsataa xiliga Juun 30 ee dhammaadka sannadka fasalkaaga 8aad. Wixii fasalka 2024, waxaa jiro ka dhaafida dhammaadka waqtiga sabab la xiriit xiritaanada dugsiga COVID-19. Ka booqo [collegebound.wa.gov](http://collegebound.wa.gov) wixii sharaxaado ah.

## Sidee ayaan ku ogaadaa haddii aan si guul ah u codsaday?

Markii arjiga Ka qeybgalka Kulliyada la bilaabo, waxaad heleysaa Warqada Warbixinta Maqan (MIL) taas oo uga baahaneyso labadaba saxiixa waalidka iyo ardaya. Wuxaan u baahan kartaa inaad calaameydis sharuuda u qalmida ee aad buuxisay. Markii arjiga la dhameystiro, waxaad ku heleysaa shahaadada Ka qeybgalka Kulliyada dhinaca boostada.

## Maxaa dhaco kadib?

Markii aad dhameystirtid arjiga Ka qeybgalka Kulliyada oo aad heshid shahaadadaada, shaqaalaha barnaamijka waxay sii wadayaan inay ku soo xasuusiyaa warbixin muhiim ah iyo aqbaaro.

## Sidee ayaan ku helaa deeqda waxbarashada?

- ▶ Buuxi sharuudaha balanqaadka deeqda waxbarashada oo buuxi sharuudaha daganaanshaha gobolka.
- ▶ Xarey FAFSA ama WASFA oo sannadkaaga hore iyo sannad walba ee aad ku jirtid kulliyada si aad u go'aansatid u qalmida daqliga.
- ▶ Lagaa ogolaado oo aad ka qeybgashid kulliyad u qalantid.
- ▶ Boos wanaagsan aad ka joogtid kulliyadaada.

Deeqda waxbarashada Ka qeybgalka Kulliyada waa barnaamij gobolka maalgeliyay oo ay maamulaan Gollaha Guusha Ardayga Washington. Wixii warbixin dheeraad ah ee ku saabsan barnaamijka iyo ku saabsan dooqyada kale ee gargaarka dhaqaalaha ee Washington, booqo [collegebound.wa.gov](http://collegebound.wa.gov) ama nagala soo xiriir i-meel ahaan ee collegebound@wsac.wa.gov, ama taleefon ahaan ee 888-535-0747, option 1.